


CANSHUURTA GAADIIDKA DHAQAAJINTA SEATTLE



TALADA DRAAFTIGA - MAARSO 2015

Siistemkena gaadiidka wuxuu muhiim u yahay tayada noloshena iyo jiritaanka dhaqaalaha. Jidodka Seattle, dhinacyada lagu socdo, iyo buundooyinka waxay dhaqaajiyaaan boqolaa kun dad maalin kasta. Intaas kaddib, waxay taageeraan helitaanka xamuulka, iyaga uu hubiya in xamuulka la gaarsiiyo gudaha iyo agagaarka magaalada si qaanadaha dukaamaada u buuxaan iyo si baakooyinka laguugu keeno albaabkaada hore. Waxaa ugu muhiimsan, adiga waxaad ku tiirsan tahay siistemka maalin kasta, haddii aad dooratid in aad qaadatid gaadiidka dadweynaha, waddid baabuur, waddid baskiil, ama aad sotcid.

Sideedii sanno ee la soo dhaafay, canshuurta gaadiidka Bridging the Gap waxay kaalmo ka geysatay wax ka qabashada dayactirka nagu aruu-ray, sugidda adeegga gaadiidka dadweynaha, iyo horumarinta ammaanka jidka. Canshuurta iminka jirta waxay dhici doontaa dhamaadka 2015. Gaadiidkena duugga, dadka dhakhso u soo batta, iyo isbaddalada ku dhaca baahida safarka waxay u baahan yahiin maal gelin dheeraad ah si loo hubiyo in qof kasta la gaarsiiyo safar wanaagsan, ammaan ah, oo leysku haleyn karo.

Si loo gaaro tani, Duqa Magaalada Ed Murray wuxuu keenay Dhaqaaji Seattle (Move Seattel) - aragtidiisa gaadidka tobanka sanno ee ku saabsan midaynta qorshooyinkena muddada dheer xagga socodka, waddidaa baskiilka, gaadiidka dadweynaha, iyo xamuulka taasoo si dhamaystiran u abaarta la kullanka baahida Seattle maanta iyo berito. Si looga dhabeeyo aragtidaan, shayga muhiimka ah waa canshuurta cusub ee gaadiidka si loo baddalo canshuurta dhici doonto. Canshuurta Gaadiidka Dhaqaajinta Seattle waa talo draafi ah oo ujeedadeedu tahay in ay wax laga qabto aasaaska, dayactirka jidatkena, buundooyinka, iyo dhinacyada lagu socdo, isla markaasna maal gelin lagu sameeyo mustaqbalka xagga horumarinta, si aan u helno xulasho badan oo ku saabsan safarka, loona siiyo gaadiid dadka badan ee ku sugar gudaha iyo agagaarka Seattle.

Waxaan rabnaa in aan helno fikradaada iyo waxa aad ka qabtid talada draaftiga la soo jeediyay ka hor inta Duqa Magaalada Murray uusan u dirin Guddiga Magaalada Seattle bisha Maajo. Magaalada waxay u baahan tahay in ay Dagmada King u soo gudbiso talada ugu dambeysa ee ku saabsan canshuurta horaanta Agoosto si looga qeybgeliyo cod bixinta dhici doonto Nofeembar 2015.

Qeyb ka noqo wada hadalka iyo kaalmee qaabeynta talada canshuurta gaadiidka. Fiiri bogga dambe si aad u heshid tafaasiil.



“Seattle waxay ka mid tahay magaaloooyinka sida degdeggaa u soo kora waddanka. Canshuurta Gaadiidka Dhaqaajinta Seattle waxay maal gelin doontaa ammaanka aasaasiga iyo dayactirka siistemkena gaadiidka. Waxay kaloo na siin doontaa fursad muhiim ah oo aan dib qaab u qaabeyno sida dadkena soo battay u dhaqaqaan, maanta iyo birito.”

— Mayor Edward Murray

Talada Draaftiga Canshuurta Gaadiidka Dhaqaajinta Seattle

DARYEELKA AASAASIGA

Bacdamaa ammaanku yahay mudnaaantena ugu sareyso, canshuurta waxay maal gelin doontaa hagaajinta dhul gariirka, hagaajinta socota iyo dayactirka dhismaha gaadiidka. In maanta la fulliyo baahida dayactirka loo baahan yahay maalin kasta waxay berito noo dhaqaaleyn doontaa lacag.

MAGAALO AMMAAN AH

Xaji ammaanka musaafiriinta Seattle iyadoo laga shaqeya sida loo cirib tiro shilalka culus ee dhimashada keena lana xoojiyo buundooyinka u nugul dhul gariirka

\$350 malyan muddo 9 sanno

Fulli barnaamij lagu cirib tiro shilalka culus ee dhimashada u keena jidadka Seattle

- Dhamaystir 12-15 mashaariicda ammaanka jidadka, horumarinta ammaanka dhamaan musaafiriinta adeegsata dhamaan jidadkena ku badan shilalka
- Dhamaystir 9-12 mashaariicda Ammaanka Wadooyinka lagu Tago Dugsiga (Safe Routes to School) sannad kasta iyo raacinta aqoonta ammaanka, horumarinta ammaanka socodka iyo wadidda baskiilkla laga barto dugsi kasta oo ka mid ah dugsiyada dadweynaha.
- Kordhi tirada dib u rinjiyeenta meelaha laga gudbo jidka ilaa afar-sanno ama muddo ka badan si loo hubiyo in si wanaagsan loo calaameeyo meelaha laga gudbo jidka.

Badbaadi musaafiriintena ugu nugul - dadka socda iyo kuwa wata baskiilkla

- Dhis qyaas ahaan 50 mayl leemanka baskiilkla maro ee cusub iyo 60 mayl oo ah meelaha cagaaran, taasoo dhamaystirta in ka badan bar ka bar shabakada magaalada Qorshaha Guud Baskiilkla (Bicycle Master Plan)
- Hagaaji ilaa 225 blogyada dhinacyada lagu socdo ee burburay kuna yaal gudaha xarumaha magaalada hoose iyo xaafadaha
- Hagaaj taagyada dhinacyada lagu socdo iyo meelaha laga gudbo, ilaa 750 isgoys magaalada oo idil
- Dhamaystir qeypta maqan ee isku xerta jidka Burke-Gilman Trail Missing Link ee Ballard

Adkeey ammaanka buundooyinkena

- Dhamaystir shaqada hartay ee la xariirta hagaajinta meelaha loo baahan yahay buundooyinka
- Xooji 16 buundo oo u nugul dhul gariirka
- Baddal buundada looxa baabuurta marto ee ugu dambeysyo Seattle (waddada Fairview Avenue), taasoo isku xerta labada xarumood magaalada ee ugu shaqada badan
- Qorsheey iyo handaso u sameey baddalaadda buundada mudnaanta hore leh si loo bilaabo dhismaha sannadka 2024 kaddib



MAGAALO LA AWOODO

Maanta maal gasho dayactirka si aad isaga ilaalisid kharash badan oo goor dambe lagu soo dallaco dadka daggan Seattle iyo waxaad bixisaa talooyin kale xagga lahaashada baabuur, sida fursadaha badan ee la xariira safarka la awoodo.

\$275 malyan muddo 9 sanno

Dayactir iyo casriyey 250 mayl-leen oo ka tirsan jidadkena ugu baabuurta badan

- Dib u dhis laamiga 180 mayl-leen jidadka halbowlahaa, dayactir iyo casriyey 35% jidadka saxmada badan ee Seattle ay adeegsadaan dadka iyo xamuulka
- Dib u dhis laamiga 65 goobo isha lagu haayo sannad kasta, iskudarkoodana yahay 7-8 mayl-leen jidka halbowlahaa marka leysku celceliyo halkii sanno, una raaci barnaamijka hagaajinta iyo dayactirka ay shaqaalahaa Magaalada fulliyan

Bixi qalabka dadka ku kaalmeeya in ay meelaha ku wareegaan iyaga oo aan bixinin kharashka ku baxa milkiyadda baabuurka

- La shaqee ganacsatada si loo horumariyo shaqaalahaa in ay helaan baaska gaadiidka, qeybsadaan baskiilkla iyo xubin ka noqdaan wadaagga baabuurka
- La shaqee dadka daggan, milkiileyaasha hantida, iyo shirkadaha dhismooyinka cusub si loo hubsado in la helo gaadiidka, la wadaago baabuurta, la wadaago baskiilkla, iyo fursado kale oo la xariira safarka.

Talada Draaftiga Canshuurta Gaadiidka Dhaqaajinta Seattle

DHISMAHA MUSTAQBALKA

Marka Seattle korto, siistemkena gaadiidka waa in uu koro iyo waa in uu isbaddalo. Canshuurta la soo jeediyay waxay ahamiyadda siisaa horumarinta siistem isku xeran, oo bixiya fursadaha safarka sida sahlan loo adeegsan karo, leysku haleyn karo, qof kastana awoodo.

MAGAALO ISKU XERAN

Bixi siistem gaadiid si fudud loo isticmaalo, leysku haleyn karo oo musaafiriinta siisa fursadaha ay rabaan marka ay doonaan

\$170 malyan muddo 9 sanno

Casriyey jidadka duugga si aad dadka u siisid waxa u roon iyo fursadaha safarka la awoodo

- Dhamaystir 7-10 mashaariicda jidka gaadiidka isku xeran, dib u handasidda jidadka waaweyn si loo hagaajiyo xariirkka iyo ammaanka dhamaan musaafiriinta, ha socdeen, ha wadeen baaskiil, baabuur, ama ha qaateen gaadiidka dadweynaha
- Ka dhig adeegga baska wax leysku haleyn karo iyadoo la adeegsanaayo barnaamijka hagaajinta gaadiidka dhamaystiran si looga hortago cariiriga ka jira goobaha muhiimka ah
- Toosi waqtiga nalalka baabuurta 5 jid oo ku yaal magaalada sannad kasta si loo hagaajiyo socodka baabuurta iyo adeegga la siiyo dadka ku jira gudaha baabuurta yaryar iyo gawaarida, kuwa saaran baskiilada, gaadiidka dadweynaha, iyo kuwo lugeeya.
- Abuur 7 waddo cusub, tayo sare, ay adeegsadaan gaadiidka dadweynaha xawliga ku socda

Hagaaji xariirkka treenka fudud

- Maal gelinta saldhingga treenka fudud Link ee ku yaal waddada Graham Street, koofur bari Seattle
- Maal gelinta buundada dadka lugeeya iyo baskiilkka waddada I-5 iskuna xerta treenka fudud ee Northgate
- Dhismaha meelaha isku xera dadka lugeeya iyo baskiilkka ilaa saldhigiyada treenka fudud

Fududeynta socdka iyo baaskiilada lagu wado gudaha Seattle

- Dhismaha 100 blogyada dhinacyada cusub ee lagu socdo, buuxinta 50% godadka dhinacyada lagu socdo jidadka ahamiyadda u leh gaadiidka magaalada oo idil
- Sugidda ammaanka jidadka la daggan yahay kuwa aan lahayn dhinacyada lagu socdo kana dhig kuwo u roon socdka
- Dhismaha 1,500 meelo cusub oo la dhigta baskiilada magaalada oo idil

MAGAALO NOOL

Maal gelinta jidatka iyo dhinacyada lagu socdo kana socdaan hawlaha dhaqaalaha iyo bulshada

\$105 malyan muddo 9 sanno

Hagaajinta dhaqaqa xamuulka iyo baabuurta geysa

- Bixinta maaliyadda xaafadda si loo handaso loona dhiso Lander Street Overpass
- Dhismaha jidka East Marginal Way, waddo muhiim ah oo ka tirsan shabakada Heavy Haul Network ee Seattle
- Maal gelinta barnaamijka hagaajinta meelaha u baahan si loo kaalmeeyo dhaqaqa xamuulka.

Maal gelinta mashaariicda mudnaanta la siiyo xaafadda

- Dhamaystirka 20-35 mashaariic muhiim ah oo laga fulliyo xaafadaha si loo harumariyo ammaanka, dhaqaqa iyo helitaanka iyo tayada nolosha xaafadahaas

Daryeelka jiqdenna ku taal magaalada iyo hagaajinta dareerinta bulshadaha u nugul fattahaadda

- Baddalaadda geed kasta oo meesha laga gooyo taasoo ugu wacan cudurka ama ammaanka kuna baddal labo geed cusub
- Ku daridda koox cusub oo ahamiyadda siisa geedaha, degdeg uga jawaabta baahida jaridda lagama maarmaanka ah (sida meelaha dadka ku wadaan baskiilada kuna socdaan, iyo meelaha baska joogsadol) iyo hubinta in la baneyyo oo si wanaagsan loo arko nalalka baabuurta iyo calaamadaha.
- Sharaako lala noqo Danabka Dadweynaha Seattle si laami loo saaro jidatka, la dhiso meelo cusub ay dadka maraan kana gudbaan, iyo wax ka qabashada arrimaha dareerinta meelaha u nugul fattahaadda xaafadaha South Park iyo Broadview



MAALGELINTA TALADA CANSHUURTA IYO KHARASHKA

Dhamaadka 2015, wuxuu waqtigeeda dhamaan doonaa canshuurta gaadiidka \$365 malyan, ee 9ka sanno iminka lagu jiro (laguna magacaabo Bridging the Gap). Canshuurta Gaadiidka Dhaqaajinta Seattle waxay baddali doontaa Bridging the Gap iyo waxay sii wadi doontaa dadaalka loogu jiro xajinta ammaanka siistemka gaadiidka sida wanaagsan u shaqeeyaa, isla markaasna in badan ka qabata maal gelinta baahida gaadiidka mustaqbalka magaaladena. Canshuurta la soo jeediyay waxay gaari doontaa sagaal sanno iyo waxay soo saari doontaa \$95 malyan halkii sanno, ku dhawaad \$900 malyan marka leysku daro.

Waxaa laga bixin doonaa canshuurta hantida taasoo reerka dhexe Seattle ku soo dallici doonto \$450,000 ku dhawaad \$275 halkii sanno. Marka la barbar dhigo, kharashka canshuurta ku sugaran dhicid ee Bridging the Gap, ku dhawaad \$130 dhexdhexaad halkii sanno ayaa ku soo aadi doonto reerka Seattle.

\$900ka malyan ee la soo saaray inta canshuurta jirto waxaa la socda in Magaalada Seattle qiyaasto in maaliyadaan loo adeegsan karo in lagu soo saaro ku dhawaad \$2 balyan dheeraad ku ah maal gelinta gaadiidka.

QEYB KA NOQQO QAAB U YEELIDDA GAADIIDKENA MUSTAQBALKA

Waxaan u baahanahay ka-qeybgalkaada iyo war celintaada ku saabsan Canshuurta Gaadiidka Dhaqaajinta Seattle. Wadajir ahaan, waxaan hubsan karnaa in siistemkena gaadiidka uu si wanaagsan u shaqeeyo, leysku haleyn karo, qof kastana uu isticmaali karo.

Booqo www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle si aad u:

- Qaadatid Wareysiga Mudnaanta Canshuurta Gaadiidka
- Isku qor la socodsiinta emailka
- Hel tafaasiil badan oo ku saabsan talada canshuurta
- Hubso jadwalkena buuxa ee ku saabsan la xariirka dadweynaha



Tag wada hadalka bulshada ee soo socda si aad si toosan shaqaalahaa kala hadashid talada la soo jeediyay iyo ahamiyadda aad siisid gaadiidka:

Sabtid, Maars 28 (Koofur Bari Seattle):
New Holly Gathering Hall
7054 32nd Ave S, Seattle 98118
10 AM - 12 PM

Isniin, Maars 30 (Waqooyiga Seattle):
Roosevelt High School
1410 NE 66th St, Seattle 98115:
6 - 8 PM

Talaado, Maars 31 (Galbeedka Seattle):
West Seattle High School
3000 California Ave SW, Seattle 98116
6 - 8 PM

In badan ka ogaaaw www.seattle.gov/LevytoMoveSeattle